

Cusboonaysiinta Dayrta 2025 ee Ku Saabsan Bilawga Shatiga Daryeelka Carruurta ee Qoysaska — Provider Hub

Fariintan waxaa loo soo diray dadka haysta shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska Minnesota si ay ula socdaan bilawga nidaamka shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska ee lagu maamulo Provider Hub.

Dowladda Gobolka Minnesota waxay sii waddaa horumarinta diyaarinta maamulka shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska gudaha Provider Hub. Waxaanu ku ballanqaadnay inaan idiinla wadaagno macluumaadka marka uu diyaar noqdo. Xagaagii hore, waxaan idinla wadaagnay warbixin cusub oo ku saabsan jadwalka. Cusboonaysiinta dayrta ee sanadkan, waxaanu ku dhawaaqaynaa **amarka gobollada lagu bilaabayo nidaamka cusub**.

Waxaad dib u eegi kartaa warbixintii [xagaaga 2025 ee lagu soo diray iimaylka July 8 \(PDF\)](#). Halkan waxaan mar kale ku wadaagnaa macluumaadkaas, iyo sidoo kale xogta cusub ee ku saabsan amarka gobollada lagu bilaabayo nidaamka. Riix xiriiriyeyaasha hoos ku qoran si aad si toos ah ugu tagto qaybta aad rabto:

- [Waa maxay Provider Hub](#)
- [Goorma ayaa lagaa doonayaa inaad isticmaasho aaladda khadka tooska ah ee shatiga](#)
- [Amarka gobollada lagu bilaabayo – macluumaad cusub!](#)
- [Dhacdooyinka tababarka iyo macluumaadka fool-ka-foolka ah](#)
- [Siyaabo kale oo aad macluumaad u heli karto oo aad isu diyaarin karto](#)
- [Faa'iidooyinka Provider Hub](#)
- [Nala soo xiriir](#)

Waa maxay Provider Hub

Provider Hub waa aalad khaladka tooska ah (online tool) ah oo loogu talagalay bixiyeyaasha si ay uga codsadaan una maareeyaan shatiyada adeegyada bulshada, maalgelinta, iyo ka qaybgalka barnaamijyada dawladda.

Maanta, **xarumaha daryeelka** carruurta ee leh shati ama shahaado waxay u adeegsadaan Provider Hub waxyaabaha soo socda:

- Maamulka iyo shatiga/shahaado-siinta xarumaha daryeelka carruurta
- Maareynta diiwaangelinta bixiyeyaasha ee Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Carruurta (CCAP)
- Ka qaybgalka Barnaamijka Bixinta Lacagaha Taageerada ee Great Start Compensation
- Diiwaangelinta iyo xaadirinta carruurta

Bishii Agoosto 2025, **daryeel-bixiyeyaasha carruurta ee qoysaska** ayaa helay [gelitaanka Provider Hub si ay u maareeyaan diiwaangelinta Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Carruurta \(Child Care Assistance Program registration\)](#). Daryeel-bixiyeyaasha carruurta ee qoysaska waa kooxda xigta ee heli doonta gelitaanka Provider Hub si ay umaareeyaan shatiga. Waxaad heli doontaa gelitaanka astaamaha Great Start Compensation iyo diiwaangelinta iyo xaadirinta marka maamulka shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska si rasmi ah uga bilaabmo Provider Hub.

Wax badan ka ogow bogga [Provider Hub](#).

[Kor ugu nogo](#)

Goorma ayaa lagaa doonayaa inaad isticmaasho Provider Hub si aad u maareyso shatiga

Iyadoo laga duulayo aragti-celinta bixiyeyaasha iyo fahamka culayska iyo niyad-jabka la socda isbeddellada jadwalka, weli ma shaacinno jadwalka cusub ee bilawga. Waxaan aad ugu mahadcelinaynaa dulqaadkaaga. Waa kuwan macluumaadka jadwalka ee hadda jira:


- Daryeel-bixiyeyaasha carruurta ee qoysaska ee ku sugan degmooyinka ugu horreeya (Becker, Cass, Crow Wing, Douglas, Hubbard, Morrison, Stevens, Todd and Wadena) ayaa lagu wargelin doonaa taariikhda bilawga **ugu yaraan 60 maalmood ka hor**.
- **Hal bil** ayaa lagu bixin doonaa diiradda saarista bilawga aaladda khadka tooska ah ee degmooyinkan ugu horreeya.
- Kadib hal bil, Provider Hub waxa uu si tartiib tartiib ah uga bilaabmi doonaa gobollo kale, isagoo **laga hirgelinayo [gobol](#) cusub labadii toddobaadba mar, sida ku cad amarka gobollada ee hoos ku xusan**.
- Bixiyeyaasha waxaa **si hore loo ogeysiin doonaa** ka hor inta aysan bilaabin isticmaalka Provider Hub si ay u maareeyaan shatiga.

[Kor ugu nogo](#)

Amarka Gobollada Lagu Bilaabay — Macluumaad Cusub!

Maamulka shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska ee lagu maamulo Provider Hub waxa uu si tartiib tartiib ah uga bilaaban doonaa gobolka oo dhan, iyadoo la raacayo **amarkan [gobollada](#) lagu bilaabay**:

- **Bilawga hore:** Becker, Cass, Crow Wing, Douglas, Hubbard, Morrison, Stevens, Todd and Wadena (Degmooyinkan waxay la shaqeeyaan [Sourcewell](#) si ay u bixiyaan adeegyada shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska.)
- **Gobolka 4, Galbeedka Dhexe:** Clay, Grant, Otter Tail, Pope, Traverse iyo Wilkin
- **Gobolka 8, Koonfur-galbeed:** Cottonwood, Jackson, Lincoln, Lyon, Murray, Nobles, Pipestone, Redwood iyo Rock
- **Gobolka 2, Headwaters:** Beltrami, Clearwater, Lake of the Woods iyo Mahnomen
- **Gobolka 7E, Bariga Dhexe:** Chisago, Isanti, Kanabec, Mille Lacs iyo Pine



- **Gobolka 6E, Bartamaha Koonfur-galbeed:** Kandiyohi, McLeod, Meeker iyo Renville
- **Gobolka 1, Waqooyi-galbeed:** Kittson, Marshall, Norman, Pennington, Polk, Red Lake, iyo Roseau
- **Gobolka 9, Bartamaha Koonfur:** Blue Earth, Brown, Faribault, Le Sueur, Martin, Nicollet, Sibley, Waseca iyo Watonwan
- **Gobolka 7W, Bartamaha:** Benton, Sherburne, Stearns iyo Wright
- **Gobolka 3, Arrowhead:** Aitkin, Carlton, Cook, Itasca, Koochiching, Lake iyo St. Louis
- **Gobolka 6W, Waqooyiga Dooxada Minnesota:** Big Stone, Chippewa, Lac qui Parle, Swift iyo Yellow Medicine
- **Gobolka 10, Koonfur-bari:** Dodge, Fillmore, Freeborn, Goodhue, Houston, Mower, Olmsted, Rice, Steele, Wabasha iyo Winona
- **Gobolka 11, Magaalooyinka Mataanaha ah:** Anoka, Carver, Dakota, Hennepin, Ramsey, Scott iyo Washington

[Kor ugu nogo](#)

Dhacdooyinka Macluumaadka iyo Tababarka Fool-ka-Foolka ah

Marka lagu daro agabka khadka tooska ah ee laga heli karo, waxaan sidoo kale qaban doonaa dhacdooyin macluumaad iyo tababar fool-ka-fool ah gobol kasta, xilliga uu bilawga gobolkiina soo dhow yahay.

Dhacdooyinkani waa ikhtiyaari, waxaad dooran kartaa inaad ka qayb gasho ama aadan ka qayb gelin. Mid kasta oo ka mid ah dhacdooyinkan wuxuu socon doonaa qiyaastii 2-3 saacadood. Waxaa lagu soo dhoweyn doonaa inaad ka qayb gasho dhammaan kalfadhiga ama qayb ka mid ah waqtiyadaas.

Inta lagu jiro dhacdooyinkan, waxaad:

- Baran doontaa sida loo adeegsado Provider Hub si aad u maareyso una cusboonaysiiso shatigaaga

- Baran doontaa sida aad u heli karto caawimaad marka aad u baahan tahay taageero ka dib dhacdada
- Fursad u heli doontaa inaad bixiso aragti-celin ku saabsan aaladda khadka tooska ah ee Provider Hub, taas oo lala wadaagi doono kooxda Provider Hub

Dhacdooyinkani wali waa kuwo qorsheysan. Waxaana idin la wadaagi doonaa macluumaad dheeraad ah marka faahfaahinta iyo jadwalka la dhameeyo.

[Kor ugu nogo](#)

Siyaabo Kale oo Aad Macluumaad u Heli Karto oo Aad Isu Diyaarin Karto

Waxaan sii wadeynaa inaan u dirno cusboonaysiinta iimaylka ee la midka ah tan si toos ah dadka haysta shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska. Waa kuwan siyaabo kale oo aad ku heli karto macluumaad dheeraad ah oo aad isu diyaarin karto isticmaalka aaladda khadka tooska ah:

- **Ka qaybgal Kalfadhiga Macluumaadka ee Provider Hub:** Kalfadhiyadan macluumaadka ee onlaynka ah waa kuwo furan qof kasta oo danaynaya inuu wax badan ka ogaado Provider Hub, oo ay ku jiraan isticmaaleyaasha hadda jira iyo kuwa mustaqbalka. Mawduucyada laga hadlo waxaa ka mid noqon kara horumarradii ugu dambeeyey ee Provider Hub, talooyin ku saabsan sida ugu waxtarka badan ee loo isticmaalo aaladda onlaynka, iyo ilo cusub ama la cusboonaysiiyey. Ka qaybgalayaasha waxaa lagu soo dhoweynayaa inay su'aalo gudbiyaan inta lagu jiro kalfadhiga. [Isdiiwaangeli si aad noola soo biirto](#) — Talaadada, Noofambar 18, saacadda 6da fiidnimo ilaa 7da fiidnimo.
- **Isdiiwaangeli Wargeyska Provider Hub:** Wargeyskani waxa uu wadaagaa macluumaad guud oo ku saabsan Provider Hub oo loogu talagalay dadka hadda isticmaala iyo kuwa mustaqbalka. Mawduucyada lagu soo qaado waxaa ka mid noqon kara cusboonaysiinta astaamaha cusub, ilo cusub, iyo dhacdooyin soo socda. [Isdiiwaangeli](#) si aad wargeyska ugu hesho sanduuqaaga iimaylka.
- **Booqo Bogga Provider Hub:** Ka ogow waxa hadda ku jira aaladda onlaynka ah, dib u eeg ilooyinka, akhri iimaylladii hore, isdiiwaangeli kalfadhiyada macluumaadka, iyo waxyaabo kale oo badan — dhammaantood ku yaalla bogga [Provider Hub](#).

- **Sii xooji xirfadahaaga tignoolajiyada:** Samee qiimayn iskeed ah si aad u ogaatid heerka xirfadahaaga tignoolajiyada; sahamiso hagaha xirfadaha tignoolajiyada ee lagama maarmaanka u ah isticmaalka Provider Hub; oo dib u eeg [liiska ilo tignoolajiyeedka caawimaad bixiyas](#). Dhammaan ilooyinkan waxaa lagu heli karaa Ingiriisi, Hmong, Soomaali iyo Isbaanish.
- **Wac khadka macluumaadka Provider Hub:** Wac 612-504-1298 (taleefon lacag la'aan ah) si aad u maqasho macluumaad duuban oo ku saabsan aaladda khadka tooska ah, oo ay ku jiraan waxa ay daryeel-bixiyeyaasha carruurta ee qoysaska filan karaan marka ay maamulayaan shatiga, jadwalka hadda jira, iyo ilo tignoolajiyeed, iyadoo khadkani uu yahay ilo fiican oo loogu talagalay dadka doorbida inay dhageystaan macluumaadka halkii ay ka akhrin lahaayeen.

[Kor ugu nogo](#)

Faa'iidooyinka Provider Hub

Waxaan aad ugu faraxsanahay inaan bixino faa'iidooyinkan cusub ee la socda Provider Hub:

- **Gelitaan sahlan:** Firi oo ku maamul shatigaaga iyo macluumaadka barnaamijkaaga hal meel. Waxaad gali kartaa xogtaada wakhti kasta, adigoo adeegsanaya qalab kasta oo leh isku xir internet, sida taleefannada casriga ah iyo tablet-yada!
- **Kaydinta diiwaanka dijitaalka ah:** Macluumaadkaaga waxaa lagu keydiyaa aaladda khadka tooska ah, markaa waa inaad cusboonaysiisaa oo keliya marka wax is beddelaan — lama rabo gudbinta sannadlaha ah!
- **Taageero dheeraad ah:** Hel caawimaad ku saabsan isticmaalka Provider Hub adigoo la xidhiiraya koox taageero maxalli ah, onlayn ama telefoon labadaba. Kooxdani waxay bixisaa taageero farsamo waxayna ka jawaabi karaan su'aalaha la xiriira sida loo fuliyo hawlaha gudaha Provider Hub. Intaa waxaa dheer, waxaad sii heli doontaa taageerada shaqsiga kaa shatiya iyo shaqaalaha barnaamijkaaga, kuwaas oo awoodi doona inay arkaan macluumaadka aad geliso gudaha Provider Hub.
- **Luqado badan:** Xulo inaad isticmaasho aaladda oo ku qoran Ingiriisi, Isbaanish, Soomaali ama Hmong.

[Kor ugu nogo](#)

Nala Soo Xiriir

Haddii aad qabto aragti-celin ama su'aalo, fadlan iimayl u dir kooxda Provider Hub cinwaankan providerhub@state.mn.us.

Waad ku mahadsan tahay dadaalkaaga iyo shaqadaada qiimaha leh ee daryeelka carruurta iyo qoysaska Minnesota oo dhan!

[Kor ugu nogo](#)